NAPLAN Online ah – macluumaadka waalidiinta iyo daryeellayaasha

2020

Ilmahaagu wuxuu samayn doonaa imtixaanada NAPLAN ee 2020

Wasiirada waxbarashada ee Dawlada dhexe, teritoriga iyo Dawlad goboleedku waxay isku raaceen in dhamaan dugsiyadu ka gudbayaan NAPLAN-ka xaashida ku salaysan una gudbayaan NAPLAN-ka online-ka ah si loo siiyo qiimayn sax ah taas oo ah mid aad u hawlgelinaysa ardada.

Masuuliyiinta waxbarashada ee Dawlad Goboleedyada iyo territoriga ayaa go'aan ka gaari kara marka dugsiyadoodu ay u gudbayaan online. Qorshaha hadda ahi waa dhamaan dugsiyada NAPLAN Online oo 2021.

Mid ka mid ah faaiidooynika NAPLAN Online ah wuxuu ku xiriirsan yihiin, kaas (ama la jaanqaadaa) imtixaanida, kaas oo imtixaanku u soo qadimo su'aallo ama adag ama sahlan iyada oo ku xiran waxqabadka ardayga.

Ku xiriirsan (ama la jaanqaadi kara) imtixaan loo qoondeeyey in lagu qiimeeyo awooda arday badan oo kala duwan iyo si sax ah u cabirida horumarka ardayga. Maaha in ilmahaagu welwel ka qabo haddii arko su'aalo ka loolan badan sida caadiga ah, waxaa laga yaabaa inay maraan dhabo aad u qalafsan. Darajada guud ee ardayda NAPLAN waxay ku salaysan tahay tirada iyo qalafsanaanta su'aallaha ay si saxda ah uga jawaabaan.

Maxay ardaydu u sameeyaan NAPLAN?

The National Assessment Program – Literacy and Aqoonta xisaabta (NAPLAN) waxay qiimaysaa barashada qoraalka iyo xirfada aqoonta xisaabaadka muhiimka u ah ilma walba si ay horumar uga sameeyaan dugsiga iyo nolosha.

Ardada Sanadaha 3, 5, 7 iyo 9 waxay ka qaybgalaan imitixaan sanadeedka akhriska, qoraalka, hanaan qoraalka luqada (xagga higaada, naxwaha iyo astaamaynta) iyo aqoonta tirada.

Qiimayntu waxay siisaa waalidka iyo dugsiga inay fahmaan sida arday walbaa wax qabanayo waqtiga imtixaanada. NAPLAN waa hal hadaf oo wax qiimaynta dugsiga iyo hanaanka warbixinta – mana bedelayso qiimaynta socota oo ay sameeyaan macalimiinta kuna saabsan waxqabadka ardayda.

NAPLAN waxay kaloo siisaa dugsiyada iyo masuuliyiinta waxbarashada iyo dawlada macluumaad ku saabsan sida barnaamijyada waxbarashadu u shaqaynayso iyo haddii dhalinyarada Australianka helayaan barnaamijyo waxbarasho xagga aqoonta qoraalka iyo aqoonta xisaabaadka oo muhiima.

Maxay NAPLAN qiimaysaa?

NAPLAN waxay qiimaysaa xirfadaha aqoonta wax qorida iyo xisaabaadka dhamaan manaahijta dugsiga. Dhamaan masuuliyiinta xukuumada iyo kuwa aan dawliga ahayn ayaa ka qaybqaata horumarka qalabka NAPLAN.

Marka ardada lagu qiimeeyo isla aqoonta qoraalka iyo aqoonta tirada ee manhajka shaqada, iyada oo aan ku xirnayn inay dhameeyeen imtixaanka online ama kan warqada, natiijooyinka labada qaab ayaa lagu soo gudbin karaa heerka qiimaynta NAPLAN-ka. Si aad wax badan uga ogaato NAPLANK-ka Online-ka ah booqo nap.edu.au.

Sidee u caawin karaa ilmahayga inuu isdiyaariyo?

Keli ahaantiisa, NAPLAN maaha imtixaan la baran karo ardadana laga fili mayo inay sidaas sameeyaan.

Caawin ilmahaaga adiga oo u xaqiijinaya in NAPLAN uu yahay qayb ka mid ah barnaamijkooda dugsiga, lana xasuusiyo maalintaas keliya inay sameeyaan intii karaankooda.

ACARA kuma talinayso diyaargarow siyaado ah oo NAPLAN ama isticmaalida adeegyada ay la hagayaan bixiyayaashu.

Xaqiijinta in ardadu ay la socdaan adeegsiga aalladaha, ay wax ku qorayaan iyo hagida barnaamijyada ayaa qayb ka ah barashada ardayga iyo waxaa looga baahan yahay Australia Manhajkeeda laga soo bilaabo sanada ugu horraysa ee dugsiga.

NAPLAN-ka Online-ka ahi maaha imtixaanka xirfadaha keyboard-ka. Waxaa jira faraqyo sida ardaygu degdeg iyo si fiican ugu qori karo gacanta – siday u jiro kala duwanaansho sida ardaygu degdeg ugu qori karo gacanta. Ardada sanadka saddexaad waxay dhamaystiri doonaan imtixaanka warqada lagu qorayo.

Macalimiinta ayaa xaqiijin doona in ardadu la qabsadaan noocyada su'aallaha xagga imtixaanka waxayna bixin doonaan kaalmo iyo jihayn ku haboon.

Arag noocyada su'aallaha ah iyo waxqabadka la xiriira oo laga helli karo qiimaynta online-ka ah ee nap.edu.au/online-assessment/public-demonstration-site

VICTORIAN CURRICULUM AND ASSESSMENT AUTHORITY
VICTORIA State Government
NAP NATIONAL ASSESSMENT PROGRAM
acara AUSTRALIAN CURRICULUM, ASSESSMENT AND REPORTING AUTHORITY

Ka qaybgalka NAPLAN

Dhamaan ardada sanadaha 3, 5, 7 iyo 9 waxa laga filayaa inay ka qaybgalaan qiimaynta sanadlaha ee NAPLAN. Ardada leh iinta waxaa laga yaabaa inay mudan yihiin dib-u-habayn ka tarjumaysa kaalmada caadatan lagu bixiyo qiimaynta fasalka. Waxaa waajiba inaad kala hadasho macalinka isticmaalka dib u habayn kasta oo khusaysa ilmaha.

Ilmaha qaba iinta aad u xadadaysa awoodooda ka qaybgelida qiimaynta, ama ardayga dhowaan yimid Australia aana horay u hadli jirin English, waa laga yaabaa in la siiyo ka dhaafid rasmi ah.

Maamulaha dugsigaaga iyo masuulka imtixaanka goobta ayaa ku siin kara macluumaad badan oo ku saabsan habka bixinta khaaska ah ama habka loo baahan yahay in lagu hello ka dhaafid rasmi ah.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu ka maqnaa maalinta la qaadayo NAPLAN-ka?

Markay suurtagal tahay, dugsiyadu waxaa laga yaabaa inay u qaban qaabiyaan ardayda maqnayd marka la qaadayey inay sameeyaan imtixaankay gafeen waqti kale inta lagu jiro jadwalka imtixaanka dugsiga. Arday keligood ah looma ogola inay sameeyaan imtixaanada online-ka ah NAPLAN wixii ka dambeeyey 22ka May 2020.

Jadwalka NAPLAN-ka Online-ka ah 2020

Sida qiimaynta NAPLAN-ka loo samaynayo waa sagaal beri halkii uu ka ahaan lahaa saddexda berri ee lagu sheegay warqada imtixaanka. Taas waxaa looga jeedaa in dugsiyada la siiyo debecsanaanta jadwal u samaynta iyo aqbalaada dugsiyada laga yaabo inay haystaan qalab kooban.

Qiimaynta Online-ka ee NAPLAN waa furan tahay laga bilaabo Talaadada 12ka May ilaa maalinta Jimcaha 22ka May 2020.

Shuruudaha jadwalka waxaa lagu faahfaahiyey hoos.

Sidee looga warbixinayaa sida ilmahaygu wax u qabtay?

Wax qabadka arday walba waxaa lagu muujiyaa cabirka natiijada qaranka qiimayn walba. Natiijada heerka qaranka ee ugu hoosaysaa waxay muujisaa in ardaygu muujiyey xirfadaha asaasiga ah ee barashada qoraalka iyo barashada xisaabaadka looga baahan yahay si looga qaybgalo heer sanadeedkaas.

NAPLAN-ka warbixinta arday kasta ayaa waxaa bixin doona dugsiga ilmahaaga sanadka dhamaadkiisa. Haddii aadan helin warbixin, waa inaad la xiriirtaa dugsiga ilmahaaga.

Sidee natiijooyinka imtixaanka NAPLAN loo isticmaalay?

- Ardada iyo waalidiinta waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo natiijooyin gaara si looga hadlo macalimiinta horumarka.
- Macalimiintu waxay isticmaalaan natiijooyinka si aad loogu fahmo ardada ka faaiidaysan doonta loolanada waaweyn ama kaalma siyaada ah.
- Dugsiyadu waxay isticmaalaan natiijooyinka si loo garto meelaha u baahan barnaamijyo waxbarasho iyo in loo sameeyo hadafyada xagga qoraal-barashada iyo xisaab-barashada.
- Nadaamka dugsigu wuxuu isticmaalaa natiijooyin si dib loogu eego barnaamijyada iyo kaalmada la siinayo dugsiyada.
- Bulshadu waxay ka arki karaan dugsiga dhexdhexaadka ah natijooyinka NAPLAN myschool.edu.au

Xaggee ka heli karaa macluumaad intaas ka badan?

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan NAPLAN:

- la xiriir dugsiga ilmahaaga
- kala xiriir hay'ada maamulka imtixaanka maxaliga nap.edu.au/TAA
- Booqo nap.edu.au

Si aad u barato sida ACARA u maarayso macluumaadka shakhsiyeed ee NAPLAN, booqo nap.edu.au/naplanprivacy

Imtixaanka	Shuruudaha jadwalka	Inta uu soconayo	Sharaxida imtixaanka
Qoritaanka	Ardada sanada saddexaad waxay sameeyaan imtixaan ku salaysan warqad (maalinta 1aad keliya) Sanada 5aad waxaa waajiba inay bilaabaan maalinta 1aad (dugsiyadu waxaa waajiba inay mudnaanta siiyaan maalinta 1aad iyo 2aad keliya) Sanadaha 7aad iyo 9aad waxaa waajiba inay bilaabaan maalinta 2aad (dugsiyadu waxaa waajiba mudnaanta inay siiyaan dhamaystirka qoraalka 2aad iyo 3aad keliya)	Sanadka 3aad: 40 daqiiqo. Sanadka 5aad: 42 daqiiqo. Sanadka 7aad: 42 daqiiqo. Sanadka 9aad: 42 daqiiqo.	Ardada waxaa la siiyaa 'dhiirigeliyaha qoraalka' sida fikrad ama mawduuc ka dibna waxaa la weydiiyaa inuu ardaygu qoro jawaab ku saabsan mawduuc (qoraal sheeko ku salaysan ama is-qancin ah)
Akhriska	In la xaqiijiyo dugsiyada online-ka ah inay awoodaan inay dhamaystiraan imtixaanada NAPLAN-ka Fursada imtixaan qaadida sagaalka berri, ardada sanadaha 7aad iyo 9aad waxay bilaabi karaan akhriska maalinta 1aad; si kasta ahaatee, qoritaanku waa inuu bilawdaa maalinta 2aad iyada oo imtixaanka qoritaanku ka qaadanayo mudnaanta imtixaano kale oo kasta oo jadwalka ku jira maalinta 1aad Si loo buuxiyo ka hor is-fahamka imtixaanada luqada	Sanadka 3aad: 45 daqiiqo. Sanadka 5aad: 50 daqiiqo. Sanadka 7aad: 65 daqiiqo. Sanadka 9aad: 65 daqiiqo.	Ardadu waxay qoraan qoraallo kala duwan oo ah macluumaad xambaarsan, mala-awaal ama is-qancin ah ka dibna waxay ka jawaabaan su'aallaha xiriirka la leh
Luqada lagu isku raacsan yahay	Waa in la buuxiyaa akhriska imtixaanka ka dib	Sanadka 3aad: 45 daqiiqo. Sanadka 5aad: 45 daqiiqo. Sanadka 7aad: 45 daqiiqo. Sanadka 9aad: 45 daqiiqo.	Imtixaanku wuxuu qiimeeyaa higaada, naxwaha iyo astaamaynta
Aqoonta xisaabta	Waa la buuxiyaa ka dib is-fahamka imtixaanka luqada	Sanadka 3aad: 45 daqiiqo. Sanadka 5aad: 50 daqiiqo. Sanadka 7aad: 65 daqiiqo. Sanadka 9aad: 65 daqiiqo.	Imtixaankaani wuxuu qiimeeyaa tirada iyo algebra-da, cabiraada iyo geometriga, iyo xisaabinta iyo ixtimaalka